



## Beeraha Nasashada oo bixinaysa hawlaha waqtiga xagaaga oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay ardayda

*Sanad dugsiyeedka 2018-19 ayaa si xawli ah ku socda oo dhamaad ku dhow, iyada oo [ka qalin jabinta dugsiya sare](#) ay bilaabmayso Axada, isla markaana maalinta u dambeysa ee fasallada la qorsheeyay in ay tahay Juun 12. Ka dib taasi? Waa waqtigii fasaxa xagaaga! Saaxiibadeena Beeraha Nasashada & Raaxada Portland ayaa haya siyaabo badan oo kala duwan oo lacag la'aan ah si ardaydaada looga dhigo kuwo firfircoon. Marka ay noqoto iyaga:*

Ardaydu waxay heli karaan cunto iyo hawlo dhanka madadaalada waqtiga xagaaga oo dhan iyaga oo adeegsanaya Xagaaga Lacag la'aan ah ee Dadka oo dhan 'Summer Free For All', oo ah iskaashi u dhexeeya Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Beeraha Nasashada & Raaxada Portland.

Barnaamijka wuxuu bixiyaa qadooyin lacag la'aan ah, muusik ka kala socda adduunka oo idil, filimaan qoyska u wanaagsan, farshaxan, ciyaaraha isboortiga iyo ciyaaraha caadiga oo ka dhacaya beeraha nasashada Portland. Dabaasha oo lacag la'aan ah ayaa la helayaa, iyada oo aan la isdiiwaan gelin, oo ka jirta barkadaha lagu dabaasho ee magaalada kuwaasi oo la helayo maalmo iyo saacado go'an.

Jadwalka internet-ka laga helayo ee loogu talagalay Xagaaga Lacag la'aan ah ee Dadka oo dhan 'Summer Free For All', waxaad sidoo kale ka heli doontaa dhowr bandhig dhaqameed, oo ay ka mid yihiin Maalinta Tonga, Bandhiga Dhaqanka ee Muslinka iyo Bandhiga Latino.

Waxaa jira wax qof kastaa helayo—iyo ta ugu wanaagsan, waa lacag la'aan! Liiska buuxa ee dhacdooyinka, goobaha, taariikhaha iyo wakhtiyada ayaa [laga heli karaa internet-ka](#). Waxaad heli kartaa tilmaamo buuxa oo dhanka internet-ka ah oo ku qoran sideed luqadood oo dheeraad ah iyada la adeegsanayo [website-ka Beeraha Nasashada & Raaxada](#).